



Tilmaamaha Ku Laabaashada Dugsiga ee 2020 - 2021

{Tirsiga: Ogosto 5, 2020}

Ujeedada dukumintigani waa inuu muujiyo ahmiyadaha, hagida mabaadii'da, tallaabooyinka iyo qaabka lu soo laabashada dugsigeena wakhti ay jirto musiibo aan horay u dhicin, jaah-wareer, iyo loolan.

Hennepin Schools waxay qaateen Mabaadii'da Hagida MDE ee laga soo guuriyay Hagida Qorsheynta 2020-21 ee Minnesota Public Schools si ay noo xusuusiyaan shaqadeena muhiimka ah iyo si ay noogu haagan sida aan u fulineyno waxbarashada dadweynaha xilliyadaan adag.

1. Adeegso hoggaaminta adeegaha
2. Ula dhaqan qof kasta si xushmad iyo sharaf leh
3. Samee waxa saxda ah, gaar ahaan marka ay adag tahay ama marka qof uusan ku fiirinaynin
4. Weydii sida ficiladaadu u xoojiyaan ama u tirtirayaan sinnaan la'aanta qaab-dhismeedka
5. Ka horeysii wanaaga guud danaha gaarka ah
6. Noqo mid la heli karo, daah furan, oo lala xisaabtami karo
7. Ku dar hanaanka go'aan qaadashada codadka bulshooyinka ay aadka u saameyn doonto

Tusmada Qoraalka

Hordhac	2
Borotokoollada Caafimaadka iyo Amniga	3
Bixinta Tacliinta	9
Teknoolajiyadda	10
Dhaqanada La Tacaalida Jaah-wareerka	12
Saadka & Fulinta	14
Shaqaaleysiinta & Taageerada	20

Hordhac

Waan ognahay inaysan waxkastaaba “caadi” ahaan doonin marka aynu soo laabano deyrta.

Innagoo og in COVID-19 aanuu tagi doonin, in ardayda meel kasta joogaa ay seegaan waqtigii waxbarista, in barashada fog ay qayb ka noqon doonto qaabka wax lagu bari doono mustaqbalka dhow, iyo tan ugu muhiimsan, in ardaydeena iyo bulshooyinkeenu mudan yihiin wax badan - hadafka Hennepin Schools waa mid cad. Waa inaanu dejinaa qorshe dib loogu furayo labadeena dugsiga deyrtaan kaas oo ka turjumaya qiimaheena sinnaanta, himilooyinkeena ah in ardaydu guuleystaan shakhsi ahaan iyo aqoon ahaanba, iyo u heelanaanta dhammaan bulshada.

Yoolkayagu kaliya maaha inaanu albaabada furno deyrta. Waxaan rabnaa inaan ilaalino xubin kasta oo kamid ah bulshadeena oo aan xaqiijino in waxbarashadu aysan waligeed istaagin.

Kaliya ma rabno in ardaydeenu la qabsadaan adeegsiga qalabka cusub, balse waxaan rabnaa inay aad ugu fiicnaadaan.

Waxaan rabnaa waalidiinteenu inay si lamid ugu kalsoonaadaan in arday(goodu/doodu) caafimaad qabi doonaan marka ay nala joogaan, iyo inay horumar ka sameynayaan fasalada qaabka fog ee guriga lagu baranayo.

Waxaan rabnaa in qoysaskeenu ay dareemaan in laga taageero - caqabadaha caafimaad ee dhabta ah iyo caqabadaha dhaqaale ee xilligan, labadaba iyo maareynta ka barashada guriga.

Waxaan dooneynaa in shaqaalaheenu ay ogaadaan inaan mudnaanta siin doono caafimaadkooda iyo badbaadadooda, sidoo kalena waxaan dooneynaa in shaqaalaheenu ay dareemaan taageero, qalabeysnaan, iyo u diyaarsanaanta inay u shaqeeyaan ardayda. Isu dheellitirka caqabadaha badan ee adag ee lala hirdamay ee noo saamixi doona inaan albaabadeena u furno ardayda iyo qoysaska deyrtaan ayaa suurtagal ah keliya haddii shaqaalaheena si wanaagsan loo daryeelo.

Dhowrkii bilood ee la soo dhaafay, waxaan si aad ah u qorsheynaynay inaan sameyno dhammaan waxyaabaha aan kor ku soo sheegnay. Kooxdeenu waxay qoreen qorshe-hawleed dhameystiran oo faahfaahsan oo ku saabsan furayaasha guusha aan ognahay inay saameyn ku yeelan doonto furitaanka dugsiga ee deyrta 2020.

Waxa uu dugsigeenu kaga duwan yahay kuwa kale ma aha istiraatiijiyadaha aan qaadi doono si aan u shaqeeyno deyrta, laakiin waa tallaabooyinka aan qaadi doono si aan u xaqiijino in ardayda sidoo kale loogu adeego si caddaalad ah.

Waxaan isweydiinay maxaa dhacaya haddii? Maxaa dhacaya haddii aan lahayn geesinimada inaan ku riyoono waayo-aragnimo sameysa wax ka badan yareynta halista qaadista cudurka, ama barashada kala-sooca? Qorshahan Ku Laabashada Dugsiga ayaa ah jawaabtayada

Borotokoollada Caafimaadka iyo Amniga

Guudmar

Halkan Hennepin Schools, caafimaadka iyo badbaadada ardayda iyo shaqaalaha ayaa ah ahmiyadeena koowaad. Maaddaama aan qorsheyneyno in aan u guurno waxbarashadii caadiga ahayd isla markaana u yareyno halista qaadista COVID-19, waxaan derisnay moodalada iyo qaababka ugu wanaagsan ee ay adeegsadaan dugsiyada dunida daafaheeda, iyo waliba tilmaamaha ay bixiyaan Xarunta Xakameynta Cudurrada iyo Waaxda Caafimaadka ee Minnesota. Hadafkeenu waa inaan sameyno wax ka badan tilmaamaha caafimaadka ee ugu yar markasta oo ay suurtagasho si aan u ilaalino badbaadada bulshadeena.

Nidaamyadeena caafimaadka iyo badbaadadu waxay adeegsan doonaan xeeladahan soo socda ee hoos lagu faahfaahiyay:

1. **Diyaarsanaanta Xarumaha & Borotokoollada Nadiifinta ee Horumarsan**
2. **Fasal/Hormo Baaxad Xaddidan & Beddelka Macallimiinta ee Ugu Yar**
3. **Kala Fogaanshaha Jireed**
4. **Kormeerida & Baadhitaanka Caafimaadka ee Joogtada ah**
5. **Adeegsiga Waji Daboolayaasha, Wejiga iilaaliyaha iyo Gacmo Gashiga**
6. **Xaddidida Alaabada La Wadaago & Goobaha La Wadaago**
7. **Nidaamyada Maalinlaha ah ee Wax Laga Beddelay Si Loo Hirgeliyo Waxyaabaha Kore**



Kuwani waa mabaadii'da asaasiga ah ee aan eegi doono:

- U shaqeynta si heer sare ah, isla xisaabtan, iyo joogteyn leh.
- Is waafajinta dhaqanada dhammaan xarumaha, iyo xaqiijinta in markii dhaqanadu ay kala duwanaadaan ay jirto sabab macquul ah oo ku saleysan isku mid ahaanshaha iyo sinnaanta, labadaba.
- Shaqaalaha iyo ardayda waxay baran doonaan inay "gaabiyaan si ay u degdegaan".

Liinkiyada Qorsheyaasha Tallaabooyinka Degdegga ah ee u Gaarka Xarumaha ee Faahfaahsan

Ujeedooyinka qeybtan, Qorshe-hawleedka Xaaladaha Degdegga ah ee HS waxaa go'aamiya xarunta iyo nidaamyada maalinlaha ah ee loo baahan yahay in lagaga shaqeeyo gudaha dhismaha dugsiigaas.

- Hennepin Elementary School | 2123 Clinton Ave. S. Mpls, MN | K-5
- Hennepin Middle School | 3109 50th St. East, Mpls, MN | 6-8

1. Diyaarsanaanta Xarumaha & Borotokoollada Nadiifinta Horumarsan

Abaabulka kahor inta aan albaabada la furin waxay diyaarin doonaan xarumaheena waxayna xaqiijin doonaan in saad ku filan loo heli karo nadiifinta dheeraadka ah.

- Calaamado ayaa la soo dhejin doonaa si loo xaqiijiyo in xarumuhu ay bixiyaan xusuusino joogto ah oo la xiriira borotokoollada loo baahan yahay, kuwaas oo ay ku jiraan xusuusinta ardayda iyo shaqaalahu inay xirtaan af-saab, gacmaha dhaqaan, oo ay kala fogaadaan.
- Xarun kasta oo kamid ah Hennepin Schools waxaa si joogto ah oo dhameystiran loogu nadiifin doonaa dareerayaasha tirtira 99% kamid ah bakteeriyada ee khatarta ku ah COVID-19, iyadoo xoogga la saarayo meelaha aadka loo taabto iyo meelaha ay ku badan yihiin dadku.
- Hennepin Schools waxa u keysanaan doona saadka loogu talagalay nadaafadda wanaagsan, kuwaas oo ay ku jiraan saabuun, gacmo nadiifiye ugu yaraan boqolkiiba 60 ka sameysan aalkolo (loogu talagalay shaqaalaha iyo carruurta si badbaado leh u adeegsan kara gacmo nadiifiye), tuwaalo waraaq ah, sooftiyo, tirtirayaasha jeermiska dila, weji daboolayaasha marada ka sameysan (sida macquulka ah) iyo weelka qashin-qubka ah ee aan la taaban.
- Dugsiyadu waxay heysan doonaan saadka illaa 60 ilaa 90 maalmood.
- Fasal kasta iyo meelaha inta badan la maro waxa lagu rakibi doonaa mishiinka gacmo nadiifinta.
- Fasalada gudahooda, waxaan ka codsan doonaa shaqaalaha inay u tirtiraan dulaha si isdaba joog ah sida lagu faahfaahiyay qorshayaasha u gaarka ah dhismaha dugsiya.
- Ilaaliyayaasha hindhisada waxaa la sudhan doonaa/lagu rakibi doonaa goobaha ku habboon.
- Qolka musqusha ee dadka waaweyn waxa lagu dhejin doonaa hagida loogu talagalay shaqaalahu inay tirtiraan kadib adeegsiga musqusha.



2. Fasal/Hormo Baaxad Yar & Beddelka Macallimiinta ee Ugu Yar

Barta ugu horeysa ee lagu yareynayo halista qaadista ayaa noqon doonta xaddidaada baaxada fasallada iyo hormooyinka, iyo yareynta is-dhex-galka hormooyinka. Kooxaha ardayda ayaa la joogi doona isla hal macallin dhammaan maalmo dugsiyeedka, ismana dhexgali doonaan. Tani waxay yareyn doontaa faafidda waxayna fududeyn doontaa raadraaca haddii loo baahdo.



- Waxaan rajeyneynaa inaan ku bilowno sannad dugsiyeedka 10-15 arday halkii fasalba, iyo ugu badnaan 3 qof oo waaweyn wakhtigiiba, guud ahaan waa inaysan dhaafin 15-16 qof madar abaaminta qof ee fasalka gudahiisa ku jirta halkii wakhtiba.
- Ardayda HES waxay joogi doonaan hal fasal maalintii oo dhan. Kala-guurka u dhexeeya fasalada waa la joojin doonaa.
- Markii loo baahdo, sababtuna tahay waaxeynta macallimiinta/ku takhasusidda casharada, ardayda HMS waxay u kala guuri doonaan fasalada iyadoo la adeegsanayo jalas/dawan waqtigiisa la dheereeyay, taas oo gaabis ka dhigaya kala-guurka hormooyinka ee waqti kasta.

- Ardayda wada dhigan doona hal fasal ayaa sidoo kale wada sameyn doona wixii kala-guur ah ee loo baahdo, hal marna dugsiga ka wada tagi doona.
- Isu-imaatinada kooxeed ee waaweyn iyo kulamada waa la joojin doonaa, kuwaas oo ay ku jiraan safarro dibadeed, ciyaaraha fudud, iyo barnaamijyada dugsiga ka dambeeya.
- Guud ahaan, Hennepin Schools waxay xaddidi doontaa inay xaruumahaadu ay yimaadaan dhammaan soo booqdayaashu.
 - Kulamada lala yeesho qoysaska ardayda waxaa lagu qaban doonaa taleefanka iyo shirarka muuqaalka ah.
 - Shaqaalaha carruurtoodu (aysan dhigan HS) uma soo kaxeysan karaan shaqada.

3. Kala Fogaanshaha Jireed

Xitaa iyadoo la sameeyay kooxo/hormooyin, shaqaalaha iyo ardaydu waa inay joogteeyaan borotokoollada kala fogaanshaha jireed.



- Dhammaan shaqaalaha iyo ardaydu waa inay markasta u hogaansamaan awaamiirta kala fogaanshaha jireed ee HS (ee hadda ah 6 fuudh).
- Fasal walba wuxuu yeelan doonaa qaabeynta miisaska kaas oo xoojinaya kala fogaanshaha jireed, una saamaxeya ardayda iyo shaqaalaha inay dhowr fuudh kala fogaadaan.
- Is gacan qaadida iyo waxyaabaha kale ee joogtada ah ee u baahan istaabashada jireed waa la mamnuucay. Shaqaalaha ma taaban karaan ardayda. Kaliya is habsiinta, is gacan qaadida, iyo gacan isu taagida dadban ayaa la oggolyay.
- Calaamado ayaa lagu dhejin doonaa saxgadda meelaha ay ardaydu u gudubto si uga caawiso kala fogaanshaha.

4. Kormeerida & Baadhitaanka Caafimaadka ee Joogtada ah

Waxaan kormeerid iyo baadhitaan joogto ah ku sameyn doonaa ardayda iyo shaqaalaha si aan u xaqiijino inaan si habboon uga saarno kuwa cudurka laga yaabo inay cudurka qabaan una jebino silsiladda faafinta cudurka ee hormooyinka ardayda iyo shaqaalaha ah ee ay saameysay.



- Hennepin Schools waxay ilaalin doonaan dhamaan macluumaadka caafimaadka ee ardayda iyo shaqaalaha.
- Dhammaan ardayda iyo shaqaalaha waxa la hubin doonaa heerkulkooda iyadoo la isticmaalayo heerkulbeeg aan la taabsiin doonin iyo/ama teknoolajiyad heerkulbeeg marka ay soo galaan dhismaha. Arday kasta ama xubin kasta oo shaqaalaha kamid ah oo heerkulkoodu ka sareeyo 100 digrii ayaa laga mamnuuci doonaa galida fasallada waxaana loo diri doonaa guriga.
- Xarun walbaa waxay yeelan doontaa qolka saaritaanka la xiriira caafimaadka kaaas oo loogu talagalay ardayda aan isla markiiba la qaadi/diri karin.

- Ardayda iyo shaqaalaha laga helo COVID-19 waxaa laga codsan doonaa inay joogaan guriga ugu yaraan 14 maalmood.
- Ardayda iyo shaqaalaha calaamadaha lagu arko waxa lagu dhiirrigelin doonaa inay iskaga baadhaan COVID-19 sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah.
- Haddii arday ama xubin kamid ah shaqaalaha laga helo cudurka, shaqaalaha Hennepin Schools waxay hirgalin doonaan borotokoolka isgaarsiinta caadiga ah ee:
 - La socodsiiin doona kiisaska Waaxda Caafimaadka ee MN sida la faray isla markaana xaqiijin doona inay qaadi karaan tallaabooyin raadraaca ee munaasibka ah.
 - Ogeysiin doona daneeyayaasha ay khuseyso, iyadoo isla wakhtigaas la qaadayo tallaabooyinka lagu difaacayo asturnaanta ardayda shakhsiga ah ama xubnaha shaqaalaha.
 - Xidhi doona koox arday oo gaar ah ilaa 14 maalmood.
- Haddii qof kale oo isla guriga kula nool ardayga ama xubinta kamidka ah shaqaalaha laga helo COVID-19, ardaygaas ama xubintaas shaqaaluhu waa inuusan caadi u iman dugsiga 14 maalmood.
- Haddii qof lala soo xiriiryo iyada oo la adeegsanayo raadraaca oo loo sheego inuu ka ag dhawaaday qof laga helay cudurka, laguna amro inuu iskarantiilo, waa inay sidaas sameeyaan.

5. Adeegsiga Waji Daboolayaasha, Wejiga Ilaaliyaasha iyo Gacmo Gashiga

Sida ay sheegtay CDC, “COVID-19 wuxuu badanaa ugu faafaa dadka dhexdiisa dhibcaha neefta la socda ee la soo saaro marka qof cudurka qabaa uu qufaco, hindhiso, ama hadlo. Dhibcahani waxay ku dhici karaan afka ama sanko dadka u dhow ama waxaaba laga yaabaa inay galaan sambabada. Waxaan xiran doonaa af-saabyada marada ah/waji daboole si aan u xakameyno faafidda fayraska una curyaamino in dadka cudurka qaba ee an la ogayni ay u gudbiyaan kuwa kale.



- Hennepin Schools waxay siin doonaan, ugu yaraan 1 af-saab oo dib loo isticmaali karo xubin kasta oo shaqaale ah iyo 1 af-saab oo dib loo isticmaali karo arday kasta oo HS dhigta. Waji daboolayaasha dheeraadka ah ee la tuuri karo ayaa lagu keydin doonaa goobta.
- Shaqaaluhu waa inay xidhaan af-saab maro ah/weji daboole marwalba ama af-saab maro ah/weji daboole iyo weji ilaaliyayaasha la bixiyay.
- Gacmi gashiyada ayaa ay heli karaan shaqaalaha marka ay nadiifinayaan fasalada ama meelaha la taabto ee la wadaago.
- Ardayda ku jirta K-2 waxaa looga baahan doonaa inay xidhaan weji ilaaliyayaal marwalba, khasatan waqtiyada uu kala-fogaanshaha jireed uu adag yahay.
- Ardayda fasalada 3--8 waxaa looga baahan doonaa inay xidhaan af-saab maro ah/weji daboole marwalba, khasatan wakhtiyada kala fogaanshaha jireed uu adag yahay.
- Ardayda waa in si joogta ah loo xusuusiyaa inaysan taaban weji daboole isla markaana ay gacmaha dhaqaan si joogto ah.

- Waxaan siin doonaa dhammaan xubnaha bulshada hagid la xiriirta nadaafinta iyo dib u adeegsiga weji daboolaha.
- Fiiro gaar ah: weji daboolayaasha waxa loogu talagalay in lagu ilaaliyo dadka kale haddii ay dhacdo in qofka xidhani uu qabo cudurka laakiin uusan laheyn astaamo.

6. Xaddidida Alaabada La Wadaago & Goobaha La Wadaago

Waxaan xaddidi doonaa adeegsiga waxyaabaha la wadaago iyo meelaha ay shaqaalahu ka qaadi karaan fayraska ee uu wali dul nool yahay fayrasku.



- **Alaabada La Wadaago**
 - Dugsiyadu waxay xaqiijin doonaan inay heystaan saad ku filan si loo yareeyo wadaagida alaabada meeshii ay suurogal tahay.
 - Sida ku xusan qeybta Teknoolajiyadda, ardayda fasalada 3-8 wuxuu midkiiba heli doonaa hal teknoolajiyad kaas oo ay u qaadan doonaan kana qaadan doonaan dugsiya.
 - Shaqaaluhu waxay heli doonaan qalab ay iskood u leeyihiin, kuwaas oo ay kamid yihiin qalinka samuurada, rumuutyada wax lagu sharaxo, iyo qalabka kale ee muhiimka ah.
- **Goobaha La Wadaago**
 - Ardaydu ma isticmaali doonaan goobaha la wadaago ee aan jeermiska laga nadiifin inta u dhexeysa adeegsiyada.
 - Ardayda waxay wadaagi doonaan miisaska, laakiin kahor iyo kadib marka si wanaagsan loo nadiifiyo.
 - Helitaanka iyo adeegsiga shaqaalaha ee goobaha la wadaago waa la xaddidi doonaa (tusaale ahaan Xafiiska guud iyo qolalka nasashadu waxay yeelan doonaan xaddiga ugu badan ee ay qaadi karaan iyadoo ku xiran meelaha banaan).
 - Ardayda K-5 ma isticmaali doonaan roogag.
 - 6–8 waxay soo qaadan doonaan boorsooyinka dhabarka maalin walba (gal fayl, chromebook).
 - Ardayda K-8 looma oggolaan doono inay adeegsadaan meelaha biyaha laga shubto.

7. Nidaamyada Maalinlaha ah ee Wax Laga Beddelay Si Loo Hirgeliyo Waxyaabaha Kore

Si looga taageero shaqaalaha iyo ardayda sidii ay u fulin lahaayeen dhammaan filashooyinka kore, hogaamiyaasha dugsiyada waxay u adeegsan doonaan nidaamyada maalinlaha ah sidan soo socota si loo xaqiijiyo caafimaadka ardayda.



- Marka ay shaqaalahu soo galaan goobta, waxa la cabbiri doonaa heerkulka shaqaalaha.

- Wax ka beddelka shirarka shaqaalaha ayaa loo baahan karaa iyadoo ku xiran tirada shaqaalaha iyo goobaha la heli karo (waa in kala fogaadaa).
- Nidaamka imaatinka ayaa wax laga beddeli doonaa si loo xaqiijiyo kala-fogaanshaha jireed, shaqaaluhu ayaa ardayda ku sameyn doona hubinta heerkulka ee aan taabashada lahayn, dhammaan ardayduna waxay isticmaali doonaan gacmo nadiifiye.
- Cuntada waxaa lagu bixin doonaa fasalada ama waxa makhaayada laga hirgelin doonaa borotokool kala-fogaansho oo adag.
- Nidaamyada kala dirista ardayda ayaa wax laga beddeli doonaa si loo xaqiijiyo kala-fogaanshaha jireed.
- Taageerooyinka hormuudka, adeegyada shaqada bulshada, iyo adeegyada la xiriira waxay u baahan doonaan in isbeddel lagu sameeyo goobaha lagu bixiyo iyo sida loo bixiyo.
- Habraacyada musqusha ee ardayda ayaa la cayimi doonaa si loo xaqiijiyo yareynta tirada ardayda, kala-fogaanshaha jireed, iyo gacmo dhaqista.
- Habraacyada fasalka dhexdiisu waxay yareyn doonaan ardayda taabanaya agab isku mid ah - waa inay waxka beddel ku sameeyaan gudbinta waraaqaha.
- Ma jiri doonaan kulamada fool ka foolka ah ee bulshada ee heer fasal ama heer dugsi.
- Ardayda iyo shaqaaluhu waxay sameyn doonaan gacmo-dhaqid iyo fayadhowr joogto ah, waqtiyada loo cayimayna waxa dari doonaa jadwalka.
- Ardayda ayaa heli doona tilmaamo cad inta lagu gudajiro labada toddobaad ee ugu horreeya kuwaas oo ku saabsan caafimaadka iyo nadaafadda inta lagu jiro kulamada subaxdii ee maalinlaha ah.

Bixinta Tacliinta

Waxaan aqoonsannahay in barashada fog ay sii ahaan doonto

qaab kamid ah tacliinta Hennepin Schools ee mustaqbalka dhow, ee la saadlin karo.

Qoysaska aan doorbidaynin inay carruurtooda u diraan dugsiga iyo in la hirgaliyo tilmaamaha kala-fogaanshaha, waxaan fileynaa in barashada fog ay noqon doonto

qayb kamid ah nashqada tacliinta.

Ardayda badankood ma awoodi doonaan inay helaan waxbarashada caadiga ah ee maalinlaha ah. Wali, waxaan aqoonsannahay in tacliinta fog aan loo wada helin si loo siman yahay lagana yaabo inaanay wada qaadan karin dhammaan ardaydu.

Ardayda fasalada K-8 waxay qaadan doonaan 2 maalmood oo la imanayo toddobaadkii lana joogayo 7 saacadood maalintiiba iyo

saddex maalmood oo waxbarashada fog ah.

Markii aan waajahnay caqabado adag, waxaan mudnaanta u siinay

tacliinta caadiga ee ardayda

qaabkan soo socda:

- IEP-yada u baahan adeegyo ka badan 60% ee wakhtiga.
- Ardayda bilaa hoyga ah
- Ardayda Shaqaalaha Daruuriga ah, sida lagu qeexay Amarka Madaxweynaha

Guud ahaan, waxaan sidoo kale fileynaa in ardayda waaweyni

ay si ka madax banaan ugu guuleysan karaan tacliinta

qaabka fog marka la barbardhigo kuwa yaryar.

Nidaamka Darajeynta & Qaabka Qiimeynta

Waxaan aburnay siyaasad darajeyn iyo qaab qiimeyn oo fudeydin doona fulinta haddii aan adeegsanayno qaabka caadiga ah, qaabka isku-dhafan, iyo/ama qaabka fog.

Teknoolajiyadda

Guudmar: Himilada

Hennepin Schools waxay maalgashi ku sameyn doonaan kaabayaasha, ilaha, iyo agabka u saamaxaya macallimiinteena inay si dabacsan iyo kalsooni leh ugu bixiyaan tacliinta si fog iyo si caadi ahba. Maalgashigan waxaa ku jira kobcinta awooda ay ardayda ku fiiriyaan dibna ugu eegaan waxbarid toos ah, si fog u soo gudbiyaan shaqada una helaan jawaab celin, iyo sida ay uga qeybqaataan la macaamilka tacliimeed ee macallimiinta iyo ardayda kale

Waxaan maalgashan doonaa hantida ma guurtada ah; abuuri doonaa kaabayaasha taageerada ah si ay noogu saamaxdo barashada dabacsan iyada oo la adeegsanayo SeeSaw iyo Google Classroom, waxaan ballaarin doonaa agabkeena waxbarista si loogu daro filashooyinka ka qeybqaadashada teknoolajiyadda.

Maalgashiga Hantida Ma Guurtada ah

- Waxaan badinay aaladaha calaa qof loo adeegsan doono si aan u taageerno barashada.
- **Dhammaan ardayda dhigata fasalada K-2 waxaa la siin doonaa taablatyoleh galal** oo ay guriga u qaadan karaan. Sidoo kale waxaan taablatyo iyo iPad ku keydin doonaa dhismaha si loo siiyo ardayda soo ilowda.
- **Dhammaan ardayda fasalada 3-8 waxay heli doonaan Chromebook.** Ardayda dhigata fasalada 6-8 waxay filan doonaan inay si joogto ah laabtobyadooda ugu qaataan guriga, xitaa marka ay dhamaato baahida loo qabo barashada fog.
- **Ardayda oo dhamaa waxay heli doonaan sameecadaha madaxa lagu xidhosi** ay u taageeraan shaqada guriga.
- Waxaan si gaar ah usoo ururinay lacag si aan u taageerno tiro yar oo qoysas ah oo u baahan aaladaha internetka ee waayarlaska.

Kaabayaasha Taageerada

- Waxaan sare u qaadnay taageeradayada maareynta aaladaha (oo ay ku jiraan casriyeynta softiweerka, xakameynta iyo kontaroolada waxyaabaha anshax xumada ah, ka saarista malware, iyo taageerada teknoolajiyadeed) la-taliyeheena teknoolajiyadda, Shunaki.
- Intaas waxaa sii dheer, Hennepin Schools waxay adeegsan doonaan baraha onlaynka ah ee soo socda si ay u taageeraan tacliinta:

Barta	Filashooyinka & Tilmaamaha Adeegsiga
Capit Learning	Barnaamijyo (App) loogu talagalay fasalada K-2 oo la jaanqaadaya heerarka gobolka ee barashada akhrinta iyo qorista alifbeetada
Google Classroom	Nidaamka Maareynta Barashada iyo bogga koorsada dadban ee dhammaan maadooyinka fasalada 6-8

Bogga internetka ee HS	Bogga Barashada Fog : Qeybta Hennepin Schools ee ka barashada internetka iyo wararka cusub ee la xiriira COVID-19
IXL	Barnaamij onlayn ah, leh heerar, xawaarihiisa la dejisan karo oo loogu talagalay ardayda si ay ugu horumaraan waxbarashadooda (Xisaabta, ELA, fasalada seyniska 4-8)
See Saw	Barnaamij lagu adeegsado fasalada K-5 si loo bixiyo tacliin, loo gudbiyo shaqada, lagunala xiriiro ardayda, qoysaska, iyo macallimiinta
Talking Points	Agabka wada xiriirka ee waalidka ee gacan ka geysta wada xiriirka fudud ee loo wada siman yahay, oo ay ku jiraan farriimaha qoraalka ah ee loo diro waalidiinta ee luqadaha badan ku qoran
Typing Club	Barnaamijka (app) adeegsiga kiiboodhka si ardayda loo baro xirfadaha qoritaanka
Zoom	Dhammaan shaqaalaha Hennepin Schools waxay leeyihiin koontooyin zoom ah oo ay maareeyayaal yihiin.
JMC Parent Portal	Bogg internet oo loogu talagalay waalidiinta si ay ula socdaan horumarka ardayga iyo imaanshaha oo si degdeg ah loo heli karo.

Dhaqanada La Tacaalida Jaah-wareerka

Dhaqanka Dugsiga

Guudmar: Himilada

Jawigan waxbarasho ee fog iyo wakhtigan lagu gudajiro wacyigelinta sii korodhay ee cadaalad darada jinsiyeed, waxaan sii wadaynaa dedaalkeena inaan ardayda siino waxbarasho u diyaarin doonta kulliyada iyo masiirka shaqo ee ay doortaan. Waxaa naga go'an in aan bixino meel loo siman yahay oo ay ardaydu wax ku bartaan iyo helitaan loo siman yahay oo aan siino dhammaan ilaha ardayda iyo qoysaska. Waxaan taageeri doonaa oo kaafiyi doonaa baahiyaha ardayda inkasta oo uu jiro isbeddelka goobteena waxbarasho.

Waan ugu talagalnay casharada ay ardaydeenu kula hirdamaan fasalada waxbarashada iyo sidoo kale kulamada subaxnimada. Waxaan sare u qaadnaa arrimaha la xiriira cadaaladda bulshada ardaydeena waxaan dhiirrigelinaa falanqeyntooda dhacdooyinka hadda jira.

Waxaan kaloo aaminsanahay xaqiijinta in ardaydeenu la kulmaan farxad oo dareemaan in la qiimeeyo markay ka qeybqaataan khibradaha dugsiga, ha ahaato qaabka fog ee guriga ama fasalada dhismayaasheena. Waxaa naga go'an inaan aqoonsano bini aadanimada, shaqada, iyo dedaalka maalinlaha ee ardaydeena.

Waxaa naga go'an inaan hagaajino waxyeelada marka loo baahdo iyo inaan ka faaiideysano fursadaha wada xiriirka ee lala yeesho dadka kale si aan u dhisno xiriir xoogan oo u dhaxeeya macallimiinta, ardayda iyo qoysaska marka fikradaha ay kala duwanaadaan. Iyada oo loo marayo qiyamka aasaasiga ah ee ardaydeena iyo kulamada subaxnimada, waxaan xaqiijinaa in dhammaan ardayda Hennepin Schools ay ku faani doonaan cida ay yihiin, kala duwanaanshaha bulshooyinkooda, iyo xoogooda u gaarka ah ee ay ku qaadaan tallaabo si ay u horumariyaan caddaaladda.

Dhaqanada La Tacaalida Jaah-wareerka

Waxaan aaminsanahay in aqoonsashada iyo hirgalinta dhaqanada la tacaalida jaah-wareerku ee ku saleysan cilmi baaristu ay muhiim u yihiin haqab tirida baahiyaha ardayda, shaqaalaha, iyo qoysaska inta lagu jiro iyo kadib xilliyadan qalalaasaha leh. Natiijo ahaan, Hennepin Schools waxay doorteen inay si rasmi ah dhaqanada la tacaalida jaah-wareerka ugu daraan dhaqanada dugsiga sannadka dambe. Dhammaanteen waxaan qaadan doonaa tababar iyo horumarin joogto oo la xiriira dhaqanadan iyo istiraatiijiyadahan maadaama aan dooneyno inaan dhammaan daneeyayaasha u noqono jawi waxbarasho iyo shaqo oo badbaado leh.

Cabbirada Sahanka Ardayga	Tilmaamaha
<ul style="list-style-type: none"> - Waxaan dareensanahay in dhaqankayga/asalkeyga lagu xushmeeyo Hennepin Schools. - Haddii aanan fahmin wax, waxaan ku talagalaa in ugu yaraan mid kamid ah macallimiintaydu uu i caawin doono. - Waxaan dareemaa in macallimiintaydu ay i qiimeeyaan inta lagu jiro Fasalka. - Marka aan si adag u shaqeeyo macallimiintu way amaanaan ama i aqoonsadaan. - Hennepin Schools dhexdooda, waxaan ku helaa fursado badan oo aan ku dhiso xiriiri waxna kaga barta facayga. - Hennepin Schools dhexdooda, waxaan ku helaa fursado aan wax ku oggaado kagana hadlo cadaalad darrada. 	<ul style="list-style-type: none"> - Ardayda ayaa lagu meelayn doonaa DL halkii laga sameyn lahaa eriga dugsiga dibadiisa, marka ay macquul tahay - Wicitaanada taageerada oo kaliya; fasal ka saaris ma jirayso. - Ardayda waxa ka saari kara fasalada maamulka oo kaliya. - Ma jiraan cawaaqibta dugsiga kadib ah - 100% waxa la adeegsanayaa dhaqanada xallinta - Ardayda waxa looga baahan karaa inay sameeyaan shaqo dheeraad ah ama mashaariic “cawaaqib” ah - Shirarka zoom ee uu waalidka la yeelanayo macallimiinta oo kaliya.

Qorshe-dejinta & Fulinta

Guudmar: Himilada

Wakhtigan aan wadno diyaarinta furitaanka dugsiyadeena, waxaan fahamsanahay in "ku guuldareysiga qorsheyntu" ay tahay "qorsheynta fashilka." Waxaan ognahay in wax kasta oo kamid ah himiladeenu ay hirgeli doonto, oo aan guul usoo hoyn doono dugsiyadeena, anagoo u marayna qorshe-dejin wanaagsan kuwaas oo uu qofkastaa uu ku faano inuu u fuliyo si heersare ah.

Hoos ka eeg faahfaahinta iyo qorsheyaasha:

- I. Guudmarka Dib-u-furista
- II. Jadwal Taariikheedka Dugsiga
- III. Wakhtiyada Bilowga/Dhammaadka Dugsiga
- IV. Jadwalada Dugsiga
- V. Imaanshaha Ardayda
- VI. Bixinta Cuntada
- VII. Gaadiidka

Kuwani waa mabaadii'da asaasiga ah ee aan eegi doono:

- Xaqiijinta inaan si fikir leh u qorsheysanahay isuguna duubanahay- laga bilaabo bilowga. Tixgelinta isku xirnaanta waaxaha kala duwan ee dugsiyada, nidaamyada, iyo ahmiyadaha dugsiyada/ururada, waxaan si sahlan u arki doonaa dhammaan qorshayaasha si isdaba joog ah loogu fuliyo.
- Naqshadeynta barnaamijyada, nidaamyada, iyo ilaha mudnaanta siiya guusha tacliinta, sinnaanta iyo helitaanka ardayda iyo qoysaska, gaar ahaan kuwa diiradda saara nidaaminta is-dhexgalka iyo kala-guurka fudud ee u dhexeeya waxbarashada caadiga ah iyo qaabka fog.
- Isku xirida dhaqanada xarumaha kala duwan, marka ay kala duwanaadaana waxaa jira fikir cad oo ku saleysan isku mid ahaanshaha iyo sinnaanta.
- U shaqeynta si heer sare, xisaabtan, iyo joogtayn leh.

II. Guudmarka Dib-u-furista

- **Goormaan Furi Doonaa**

Dugsiyada Hennepin waxaa xukuma go'aanada ay qaataan gobolka iyo magaaladu ee la xiriira goorta aan dib ugu furi karno dugsiyadeena. Waaxda Waxbarashada Minnesota ayaa

ku dhawaaqday in nala soo ogeysiin doono Khamiis, Luulyo 30, 2020 sida aan hawlaha usii wadi doono.

- **Qaabka Dib u Furida**

Marka gobolku go'aansado inay badbaado tahay in dib loo furo dugsiga, Dugsiyada Hennepin Schools waxa u qorsheysan inay fasalada u bilaabaan ardayda maalinta Isniinta, Ogosto 24, 2020.

III. Jadwal Taariikheedka Dugsiga

Hennepin Dugsiyada waxay ka shaqeyn doonaan inay yeeshaan jadwal dugsiyeed dhameystiran oo ka turjumaya taariikhaha, dhacdooyinka khuseeya (qaabka fog ama kuwa kale), fasaxyada, iyo qiimeynada waaweyn. Nidaamyada jadwalka taariikhdu waxay sii ahaan doonaan siday ahaan jireen sannadihii la soo dhaafay, annagoo og in isku-duubnida ardayda iyo qoysasku ay hadda aad uga muhimsan tahay wakhtiyadii hore.

- [Jadwal Taariikheedka 2020 - 2021](#)

IV. Wakhtiyada Bilowga/Dhammaadka Dugsiga

Qaabka aan u waajaheyno wakhtiga bilowga iyo dhammaadka dugsiga wuxuu ka shaqeeyaa sidii loo gaari lahaa yoolalkan soo socda:

- Mid ay saadaalin karaan ardayda iyo qoysaskoodu
- Ka hortag isbeddelada xaalada dibada taas oo nooga baahan karta inaan ka guurno ama u guurno qaabab kale oo barashada caadiga ah ama qaabka fog ah.
- Tixgeli warcelinta qoyska oo buuxi baahiyaha qoyska heysta arday badan oo ay ka taageeraan ka barashada guriga.
- Isu diyaari oo filo inaan ardayda qaar ku dari karno qorshe waxbarasho oo fog oo buuxa

Saacadaha Waxbarashada Caadiga ah	Saacadaha Qaabka Isku-dhafaan	Saacadaha Qaabka Fog
<p>Waxaan adeegsan doonaa saacado waxbarasho caadi ah oo la jaanqaadaya waxa ka aan isticmaali lahayn sannad dugsiyeedkan waxaan aqoonsan doonaa habraacyada dabacsanaanta ee qaasita waalidka, gaar ahaan fasalada hoose taas oo ay sabab u tahay taxadarka kala-fogaanshaha bulshada. Fadlan xusuusnow in kuwani yihiin xilliyada hordhaca ah iyo iyo in wakhtiyada imaatinka wax laga beddeli karo mustaqbalka.*</p> <p>Dugsiga Hoose Shaqaalaha Waxbarida: 7:45 AM Imaatinka Ardayda: 8:45 AM Sii Deynta Qaadista Waalidka: TBD Sii Deynta Baska: 3:55 PM</p> <p>Dugsiga Dhexe Shaqaalaha Waxbarida: 7:45 AM Imaatinka Ardayda: 8:45 AM Sii Deynta Qaadista Waalidka: TBD Sii Deynta: 4:00 PM</p>	<p>Markay ardaydu leeyihiin maalmaha waxbarashada caadiga ah, saacadahoodu waxay ahaan doonaan sida lagu xusay saacadaha waxbarashada caadiga ah ee ku yaala dhinaca bidix.</p> <p>Markay ardaydu leeyihiin maalmaha barashada fog, ee ay ku jiraan qaab fog oo buuxa saacadahoodu waxay noqon doonaan sida ku xusan dhinaca midig.</p>	<p>Saacadaha qaabka fog ee hoose ayaa la soo saaray iyadoo lagu salaynayo dhaqanada ku habboon koritaanka.</p> <p>Dugsiga Hoose Maalin dhameystiran: Isniin, Salaasa, Khamiis, Jimce Maalin badhkeed: Arbacooyinka</p> <p>Dugsiga Dhexe Maalin dhameystiran: Isniin, Salaasa, Khamiis, Jimce Maalin badhkeed: Arbacooyinka</p>

***Xusuusin:** Gudaha xarun kasta, wakhtiga bilowga iyo dhammaadka *ma carqaladeyn doonaan* hormada ama heerka fasalku. Waxbarashada caadiga ah ee xaruun kasta waxay lahaan doontaa waqti "dambe" oo joogto ah oo loogu talagalay arday kasta oo ku sugan xaruuntaas Waqtiyada sii deynta ayaa sidoo kale noqon doona kuwo joogto ah, oo leh tagista ardayda oo gaabis ah. Waqtiyada Qaadista Ardayda ee Gaabiska ah, haddii loo baahdo, waa TBD.

Sababta: Waxaan dooneynaa inaan jadwalkeena uga dhigno mid joogto ah sida ugu macquulsan si ay qorshayaasha dhammaan dugsiyadeena uga dhigto sida ugu fudud ee suurogalka ah, iyo si aan hawlaha ugu fudeydino qoysaska heysta ardayda badan oo ku jira bulshada dugsigeena.

Qaabka Badbaadada Caafimaad ee Imaatinka iyo Sii Deynta: Waxaan xaqiijin doonaa in wakhtiyada imaatinka iyo sii deyntu ay dheer yihiin in ku filan si loo ilaaliyo kala-fogaanshaha bulshada. Sidoo kale, dugsi kastaa wuxuu lahaan doonaa waqti sii deyn oo joogto ah. Hogaamiyaasha dugsiga ayaa xaqiijin doona in ka tagista dugsiga ee ardaydu uu gaabis yahay oo uu ka hortaggo in hormooyinku ay isasoo gaadhaan. Waxaan ka shaqeyn doonaa si dhakhso leh oo hufan hawsha u dhameyno, laakiin tan macnaheedu waxay noqon kartaa in qoysaska qaada ardayda uu wakhtigooda sugitaanku yara dheeraado si loo dhowro borotokoollada badbaadada.

V. Jadwalada Dugsiga

Hogaamiyaasha dugsiga waxay diyaariyeen jadwalada dugsiga ee tixgeliya qaabka fog ee buuxa, qaabka isku-dhafan, iyo qaabka caadiga ah ee buuxa, si aan diyaar ugu noqono inaan isku beddelno qaababka kala duwan maadaama ay duruufaha gudaha iyo dibada ay isla beddelayaan xaalada caafimaad.

VI. Imaanshaha Ardayga

Hadafka nidaamyada imaanshaha ee xilliga deyrto wuxuu noqon doonaa in la fahmo cidda joogta waqtiga waxbarashada tooska ah ama caadiga ah, cida maqan, iyo si loo siiyo dabagal taageero leh ardayda iyo qoysaskan taas oo ku saabsan imaanshahooda. Waxaan qaabeynaynaa nidaamka imaanshaha si ay u fududaato fulintiisu, macno u yeelato oo lagu fulin karo qaab fog ama isku dhafan. Waxaan hiigsaneynaa inaan horumar ku sameyno hanaanka aan isticmaalno inta lagu gudajiro waxbarashada fog sida in dhibcaha imaanshaha ee ardayda dhigata qaabka fog iyo fasalka, labadaba ay maalin kasta JMC gelin doonaan macallimiinta shakhsiyadeed.

- **Qaabka fog:** Ujeedada nidaamka imaanshaha ee qaabka fog ee kaliya ayaa noqon doona in la xaqiijiyo in ardaydu ka qeybqaataan waxqabadyada barashada ee maalinlaha ah iyo in qoysaskooda lagu ogeysiyo ka qeybgalkooda. Gaar ahaan, jiritaanka waxqabadyada la-talinta ee khaaska ah ama kulamada subaxnimadu waxay noqon doonaan halbeeg fure u ah guusha aan ka gaadhno barashada dareenka-bulsheed.
- **Qaabka Isku-dhafan:** Ujeeddada nidaamka imaanshaha ee qaabka isku-dhafan wuxuu noqon doonaa in la xaqiijiyo in dhammaan ardaydu joogaan waxqabadyada barashada tooska ah (qaabka fog iyo fasalka) iyo inay xaqiijiyaan badbaadada ardayda ku jirta daryeelkeena, gudaha dhismayaasheena.
- **Adeegsiga Nidaamka Macluumaadka Ardayda:** Waxaan imaanshaha gelin doonaa JMC-keena. Waan yeelan karnaa xeer imaansho/nidaam ogeysiin oo u gaar ah COVID-19 oo loogu talagalay barashada DL sida loogu baahdo loogana helo iibiyahayaga.

VII. Habka Bixinta Cuntada

Hennepin Schools waxay iskaashiga cuntada K-8 la leeyihiin Done Right. Waxa xusid mudan in qeybtani ay ku saabsan tahay iskaashiyada iibiyasha, ee maaha qawaaniinta caafimaadka iyo badbaadada ee adeegga cuntada. Dhammaan cuntooyinka K-5 waxaa loogu bixin doonaa fasalada sababo caafimaad awgood. Borotokoollada da'da ku habboon ee qadada qolka lagu bixiyo waxa ku

sharaxi doonaa dugsiga qeybta Caafimaadka & Badbaadada ee qorshahan ee ku yaala “Nidaamyada Maalinlaha ah.”

Cunto fudud ayaa lagu bixin doonaa dugsiga lana siin doonaa kaliya Fasalada K-5. Ardayda ku jira qaabka isku-dhafan ayaa cuntada u qaadan doona guriga iyadoo adeegsanaya basaska maalmaha Salaasada (Group A) ama Jimcaha (Group B). Ardayda ku jirta qaabka barashada fog ee buuxa waxay noqon doonaan TBD qaybinta cuntada, iyadoo lagu saleynayo tirada ardayda.

VIII. Qaabka Gaadiidka

Hennepin Schools waxay ku tiirsan yihiin heshiiska ay la leeyihiin Billie Bus Transportation ee loogu talagalay qaadista dhammaan ardayda. Maadaama aanaan hubin sida adeega basku u ekaan doono si loo xaqiijiyo caafimaadka iyo badbaadada ardayda, qorshahayaga gaadiidku wuxuu ahaan doonaa sidii caadiga ahayd, laakiin qorshayaasha hordhaca ahi waa kuwan soo socda.

- **Hennepin Elementary School | 2123 Clinton Ave. S., Mpls., MN)**
 - Ardayda waxaa lagu meelayn doonaa dariiq bas oo isku-dhafan (Kooxda A iyo Kooxda B) oo ku saleysan dariiqooyinkii raashin qeybinta ee gu'gii hore.
 - Waalidka iyo Qoysasku ma awoodi doonaan inay sii qabsadaan booska qaadista ee waalidka iyo booska baska, labadaba. Isbeddel kasta oo ku yimaada gaadiidku wuxuu u baahan doonaa ogeysiis labo toddobaad ah, sababtuna waxay tahay kuraasta iyo xeerarka kala-fogaanshaha bulshada. Ardayda diiwaangashan ee aan adeegsan adeegyada baska muddo 10 maalin dugsiiyeed ah ayaa isla markiiba laga saari doonaa dariiqyada baska waana inay dib u dalbadaan boosaska baska.
 - Waxaan hadda qiimeyneynaa suurtagalnimada inaan darawal bas ku meelayno dariiq kasta oo HES ah deyrta.
 - Inta Lagu Gudajiro Qaadista Waalidka, ardayda waa laga saari doonaa fasalka. Waalidku ma gali doonaan dugsiga ama goobta jimicsiga inta lagu jiro wakhtiyada qaadista ee waalidka. Ardayda waxa loo kaxeeyn doonaa baabuurta waalidiinta waxaana loo baahan doonaa aqoonsi shaqeynaya, oo sax ah iyo saxeexa. Wakhtiyada Qaadista Ardayda ee galabtii waa la dheerayn karaa sababtan darteed.
- **Hennepin Middle School (3109 50th St. E, Mpls., MN)**
 - Ardayda waxaa lagu meelayn doonaa dariiq bas oo isku-dhafan (Kooxda A iyo Kooxda B) oo ku saleysan dariiqooyinkii raashin qeybinta ee gu'gii hore.
 - Waalidka iyo Qoysasku ma awoodi doonaan inay sii qabsadaan booska qaadista ee waalidka iyo booska baska, labadaba. Isbeddel kasta oo ku yimaada gaadiidku wuxuu u baahan doonaa ogeysiis labo toddobaad ah, sababtuna waxay tahay kuraasta iyo xeerarka kala-fogaanshaha bulshada. Ardayda diiwaangashan ee aan adeegsan adeegyada baska muddo 10 maalin dugsiiyeed ah ayaa isla markiiba laga saari doonaa dariiqyada baska waana inay dib u dalbadaan boosaska baska.
 - Waxaan hadda qiimeyneynaa suurtagalnimada inaan darawal bas ku meelayno dariiq kasta oo HMS ah deyrta. Xaddidnaanta shaqaalaha awgeed, waxa laga yaabaa inaysan suuroobin
 - Qaadista Waalidka waxay noqon doontaa fasalka. Waalidku ma gali doonaan dugsiga inta lagu jiro wakhtiyada qaadista ee waalidka. Ardayda waxaa laga qaadi doonaa isgoysyada iyadoo ay kormeerayso HMS, waalidiinta waxa looga baahan doonaa aqoonsi shaqeynaya, sax ah, iyo saxeex.

Shaqaaleysiinta & Taageerada

Guudmar

Bilowga sannad dugsiiyeedka 2020-2021, Hennepin Schools waxay aqoonsan tahay qorshayaasheeda Shaqaaleynta & Taageerada ay u baahan yihiin inay noqdaan kuwo dabacsan oo aan kaliya lagu darin baahiyaha ardayda iyo qoysaskooda, balse sidoo kale lagu daro baahiyaha macallimiinta iyo xubnaha shaqaalaha, kuwaas oo aan aaminsanahay inay yihiin Hantida ugu muhiimsan ee aan heysano ee naga caawin kara gaadhista hadafkeena. Waxaan aqoonsan nahay in dhammaan xubnaha shaqaalaha ay lahaan doonaan baahiyo gaar ah iyo aragtiyo gaar ah marka aan ku laabano dugsiga, waxaana naga go'an inaan la shaqeyno xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha si aan u buuxino baahiyahaas. Marka la eego xaalada COVID-19, waxaan fileynaa in loo baahan doono in tixgelinno gaar la siiyo kooxaha hoosta ku xusan waxaanan ku dhiirrigelineynaa hoggaamiyeyaasha dugsiga iyo xubnaha shaqaalaha inay si dhakhso leh uga shaqeeyaan qorsheynta iyo xallinta dhibaatooyinka wixii tabasho ah.

Hoos waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeri ah iyo tallaabooyin loo diyaariyay:

- I. Shaqaalaha Daruuriga ah
- II. Codsiyada Qaabilaada/Ka-dhaafitaannada Caafimaad
- III. Tixgelinnada Waalidiinta & Daryeelayaasha IV. Maalmaha Jirrada & Fasaxa Jirrada

Xarun waliba waxay yeelan doontaa qorshe Shaqaaleyn & Taageero oo ka tarjumaya goobteeda iyo xarunteeda, baratakoollada badbaadada caafimaadka, jadwalka tacliinta iyo baahiyaha kale ee shaqada. Marka lagu daro qorshe-dejinta & Fulinta, qorsheheena Shaqaaleynta & Taageerada ayaa u baahan doona inuu isku dheelitiro awooddeena aan si badbaado leh oo hufan uga shaqeyno barnaamijkeena tacliinta iyadoo la maamuusayo dabacsanaanta shaqaalaha.

I. Shaqaalaha Daruuriga ah

Ku soo laabashada dugsiga waxay nooga baahantay inaan aqoonsano cida loo tixgeliyo inay yihiin shaqaalaha “daruuriga ah” ee xaruumaheena, kuwaas oo ay ku jiraan shaqaalaha daruuriga ah ee door ahaan iyo tirada shaqaalaha daruuriga ah ee ugu yar si loo xaqiijiyo shaqada badbaadada iyo waxtarka leh ee dugsiiyadeena. Guud ahaan, waxaan ku qeexnaa shaqaale <"daruuri" ah sidan:

- Hal (1) macalin fasal kasta oo la adeegsanayo
- 1: 1 SPED EAs, haddii arday SPED dhigtaa uu joogo goobta.
- Maareeyayaasha Xafiiska
- Adeegayaasha Bulshada
- Madaxa Ardayda
- Kaaliyeyaasha Agaasimeyaasha

- Agaasimeyaasha Dugsiga

Haddii mid kasta oo kamid ah doorarkani aysan joogin xaruunta markasta oo ay ardaydu ay wax u barayaan sidii caadiga ahayd, ma aaminsanin inaan si badbaado ah ama waxtar leh uga shaqeysiin karno dugsiyadeena.

II. Codsiyada Qaabilaada/Ka-dhaaftaannada Caafimaad

Dhammaan xubnaha shaqaalaha waxaa laga filayaa inay ugu laabtaan shaqadooda qaabkii caadiga ahaa amaba qaabka fog sida ay dhigayso qorshe-dejinta & Fulintu. Waxaan ognahay in xubnaha shaqaalaha qaarkood ay yeelan karaan codsiyo qaabilaad oo ku saleysan baahiyahooda ama ta qoysaskooda, waxaan ku dedaali doonaa intii karaankayaga ah inaan uga jawaabno codsiyada qaabilaada hab macquul ah oo sinaan leh.

Codsiyada qaabilaada waxaa loo kala hormarin doonaa sidan soo socota:

1. Shaqaalaha [uu nidaamka difaaca jirkoodu ciladeysan yahay](#) amaba loo aqoonsaday inay halis sare ku jiraan* sida ay dhigayso qaadista COVID-19 ee CDC
2. Shaqaalaha ay xubnaha qoyskooda ee u dhowi yihiin [kuwo nidaamkooda difaaca jirku uu ciladeysan yahay](#) amaba halis sare ugu jira cudurka* sida ay dhigayso qaadista COVID-19 ee CDC
3. Duruufaha kale ee lagu go'aamin doono marka la eego xaaladda.

**Diwaanka Caafimaadka ayaa Loo Baahan Yahay*

Codsiyada qaabilaada waa in loogu soo gudbiyaa qoraal ahaan Maamulaha Waaxda Maareynta Shaqaalaha. Si loo ilaaliyo macluumaadka shakhsiyadeed, dhammaan codsiyada qaabilaada waa in loo gudbiyaa mhaliti@hennepinschools.org

Maamulaha Waaxda Maareynta Shaqaalaha ayaa isagoo metelaya xubnaha iskaashi la sameyn doona Agaasimayaasha Dugsiga iyo Kaaliyayaasha Agaasimaha si loo ansixiyo/loo diido codsiyada qaabilaada. Ansixinta ama diidmada codsiga waxaa la socodsiiin doona xubnaha shaqaalaha Maamulaha Waaxda Maareynta Shaqaalaha. Kormeeraha xubinta shaqaalaha ayaa la ogeysiin doonaa xaalada guud ee xubinta shaqaalaha iyadoon la shaacin sababta codsiga qaabilaada. Haddii codsiga qaabilaada la diido, ikhtiyaaradka xubinta shaqaalaha ayaa laga wada hadli doonaa. Haddii codsiga qaabilaada la ansixiyo balse shaqaalaha shaqadiisa aan lagu qabin karin qaab fog, waajibaadyo kale ayaa loo qoondeyn karaa.

Suurogal ma aha inaan awoodi doono inaan ansixino dhammaan codsiyada qaabilaada. Xaaladaha noocaas ah, xubnaha shaqaalaha waxa lagu dhiirrigelinayaa inay wada hadal la furaan hoggaamiyeyaashooda dugsiga si ay u oggaadaan haddii wax ka bedellid dheeri ah la heli karo.

Fadlan ogow:

- Shaqaalaha codsanaya qaabilaad waa in ay diyaar u ahaadaan in ay kula wadaagaan macluumaadka soo socda iimeykan mhaliti@hennepinschools.org :
 - Sidee naafanimadu u abuurto xaddidnaan
 - Sida qaabilaada la codsaday ay si waxtar leh ugu xallin doonto xaddidnaanta
 - Haddii qaabilaad kale ay xallin karto arrinta
 - Sida qaabilaada la soo jeediyay ay shaqaalaha ugu saamixi doonto inuu sii wado qabashada hawlaha daruuriga ah ee shaqada
- Si dib loogu eego si caddaalad ah, codsiyada qaabilaada waxa la qiimeyn doonaa jadwalkan wakhtiga ee soo socda:
 - Wakhtiga 1: Ogosto 10, 2020 - Ogosto 21, 2020
 - Wakhtiga 2: Ogosto 24 - Si Joogto ah
- Codsiyada qaabilaada ayaa dib-u-eegis lagu sameyn doonaa 30-kii maalmoodba mar ama si waafaqsan hagida CDC/Waaxda Tacliinta, haddba kii yar. Dib-u-ansixinta ayaa ku xiran mudnaanta la sheegay ee codsiyada qaabilaada iyo baahiyaha qorshaha Shaqaaleynta iyo Taageerada.
- Codsiyada qaabilaada waa la diidi karaa haddii loo arko kuwo aan macquul ahayn, taasi waa, haddii ansaxinta codsiga qaabilaadu uu culeys aan caadi aheyn saarayo awooda Hennepin Schools ay ku shaqeyso ama ku fuliso qorshaheeda Shaqaaleynta iyo Taageerada.
- Hogaamiyeyasha dugsiga ayaa laga yaabaa inay awoodi karaan inay fuliyaan codsiyada qaabilaada ayagoon la kulmin culeys badan oo isbeddel ku sameynaya jadwalka lana kaashanaya Maamulaha Waaxda Maareynta Shaqaalaha. Marka sidaas la sameeyo, hogaamiyeyasha dugsigu waxay xaqiijin doonaan in culeyska shaqada si isleeg loogu kala qeybiyo dhammaan xubnaha kooxda si fullinta codsiga qaabilaadu aanuu culeys badan ama xaddi shaqo oo xad dhaaf ah u saarin shaqaalaha kale.
- Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa [Komishanka Fursadaha Shaqaaleynta ee Loo Wada Siman Yahay](#) .

III. Tixgelinnada Waalidiinta & Daryeelayaasha

Waxaan fahamsanahay in waalidiinta/daryeelayaashu ay ku cusbaan doonto ku laabashada dugsiga iyo maareynta mas'uuliyadaha waalidka/daryeelaha. Annaga oo og in dabacsanaan dheeri ah loo baahan doono, waxaan fahamsanahay in “xeer” guud oo lagu dabaqo dhammaan xarumuhu laga yaabo inuusan habboonayn. Waxaan ku dhiirrigelinaynaa waalid/daryeele kasta inuu si firfircoon ula shaqeeyo hoggaanka dugsigoda si loo aqoonsado loona maareeyo baahiyahooda. Waxaan sahamin doonaa xalal dabacsan oo ilaaliya ballanqaadkeena ardayda.

Waxaan sidoo kale fahamsanahay in daryeelka carruurta loo heli karo heerar kala duwan oo ay ugu wacan tahay COVID-19, iyo in helitaanku isbeddeli karo waqti kadib markay xaaladdu isbeddesho. Haddii ay dhacdo in waalidiinta/daryeelayaashu aysan awoodin inay shaqeeyaan taas oo ay ugu wacan tahay la'aanta xanaanada carruurta, ikhtiyarro dheeraad ah oo Maalinta Jirrada iyo Fasaxa Qoyska ah ayaa la diyaariyey:

- Laba toddobaad (illaa 80 saac) oo ah fasax jirro oo la bixinayo saddex-meeloodow laba meelood kamid ah mushaharka joogtada ah ee shaqaalaha sababta oo ah shaqaaluhu ma awoodo inuu shaqeeyo maxaa yeelay waxa jirta baahi dhab oo loo qabo in la daryeelo qof la karantiilay (iyadoo la raacayo ammarka Federaalka, Gobolka, ama dawlada hoose ama tallada dhakhtarka), ama in la daryeelo ilmo (ka yar da'da 18 sanno) kaas oo dugsiyiisa ama xanaanadadiisu ay u xidhan tahay ama aan la heli karin sababa la xiriira COVID-19 awgood, iyo/ama haddii shaqaaluhu la kulmo xaalad aad ula mid ah ta uu cayimay Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, iyadoo lala tashanayo Xoghayeyaasha Maaliyadda iyo Shaqaalaha; iyo
- Illaa 10 toddobaad oo dheeri ah oo ah fasaxa caafimaadka iyo qoyska ee la balaadhiyay mushaharkiiisana la bixinayo saddex-meeloodow laba meelood xaddiga mushaharka joogtada ah ee shaqaalaha ugu yaraan shaqeynayay 30 maalmood, ee aan awoodin inuu shaqeeyo sababtuna ay tahay baahi dhab ah oo loo qabo fasax si loo daryeelo ilmo dugsiyiisu ama xanaanadiisa la xiray ama aan la heli karin sababo la xiriira COVID-19 awgood.
- Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa bogga macluumaadka ee [Sharciga Waxka Qabashada Hore ee Koronafayras ee Qoyska \(FFCRA\)](#).

Maalmaha Jirrada waa in la soo gudbiyaa iyada oo la raacayo tilmaamaha qeybtan soo socota:

IV. Maalmaha Jirrada & Fasaxa Jirrada

Qeybta A

- Haddii shaqaalaha laga codsado inay diiwaangeliyaan wakhtiga jirrada, waxay u soo gudbin karaan iyagoo adeegsanaya baratakoolkii caadiga ahaa HSSICK@hennepinschools.org. 10 bilood oo kasta shaqaaluhu wuxuu heystaa 8 maalmood oo jirro sannadkii ama sida ku xusan heshiiska qandaraaskooda.
- Haddii shaqaaluhu codsadaan inay is-karantiilaan muddo dheer ama uu ka codsado xirfadle caafimaad, fadlan u sheeg kormeerahaaga iyo HSSICK@hennepinschools.org
 - Shaqaale kasta oo uu saameeyay is-karantiilku, fadlan ku qor “COVID-19 Sick Leave” laynka mawduuca ee iimeylka loo diro HSSICK@hennepinschool.org maadaama “COVID-19 Sick Leave” uu u shaqeeyo si ka duwan fasaxa jirrada ee caadiga ah.
 - Shaqaale kasta oo uu saameeyay is-karantiilku, oo loo oggolaaday inuu ka shaqeeyo guriga, waxay wali u baahan doonaan inay raacaan nidaamka kor lagu soo sheegay. Qaabkan WAA INUU ansixiyaa kormeerahu kadib marka la codsado “COVID-19 Sick Leave” waxaana la beddeli karaa inta lagu gudajiro 14-ka maalmood is-karantiilka (tusaale ahaan qeyb kamid ah waqtiga is-karantiilku waxaa laga yaabaa inuu yeesho lacag bixin waqtiga intiisa kalena uu noqdo "COVID-19 Sick Leave"). Shaqaalaha qaar ayaa laga yaabaa inaysan awoodi karin inay ka shaqeeyaan guriga sidaas awgeedna waxay isticmaali karaan “COVID-19 Sick Leave” (ugu badnaan 80 saac).
- Sharciga Waxka Qabashada Hore ee Koronafayras ee Qoyska (FFCRA) wuxuu balaadhiyay ilaalinta iyo dheefaha loogu talagalay shaqaalaha uu si xun u saameeyay COVID-19 laga bilaabo Abriil 1, 2020-Diseembar 31, 2020. Eeg [halkan](#) si aad u

hesho ogeysiiska guud. Fasaxa Caafimaad/Qoys ee La Dheereeyay ma saameynayo guud ahaan maalmaha jirrada iyo shakhsiyadeed ah ee qofka.

- Shaqaalaha la karantiilay ee aan wax astaamo ah lahayn waxa loo oggolaan karaa inay ka shaqeeyaan guriga, sida uu faro kormeerahoodu.

Qeybta B

- Haddii Shaqaalahu uu Isku Arko Astaamo Lamid ah Kuwa COVID-19
 - Haddii xubin ka tirsan shaqaalahu uu isku arko astaamo lamid ah kuwa COVID-19, sida ay qeexday CDC, ama uu isla guri kula nool yahay qof qaba astaamo lamid ah kuwa COVID-19, xubintan shaqaaluhu waa in uusan soo xaadiriin shaqada ama aanuu ka ag dhawaan xubanaha shaqaalaha ama ardayda Hennepin Schools. Xubinta shaqaalaha ahi waa inuu raacaa habraacyada wicitaanka ee caadiga ah oo uu codsadaa fasaxa Maalinta Jirrada isagoo adeegsanaya iimeylka HSSICK@hennepinschools.org .
 - Xubnaha shaqaalahu waa inay si dhakhso leh ula xiriiraan dhakhtarkooda oo ay qabanqaabiyaan baaritaanka COVID-19.
 - Astaamaha waxaa kamid noqon kara:
 - Dareemida qandho ama heerkul cabbirkiisu ka sareeyo ama lamid yahay 100.0 digrii fehranayt
 - Luminta dhadhanka iyo urta
 - Qufac
 - Neefsashada oo adkaata
 - Neef qabatin
 - Madax xanuun
 - Qadhqadhyo
 - Cune xanuun
 - Gariir ama qadhqadhyo
 - Xanuunka ama damqashada muruqa
 - Shuban
 - Shakhsiga ama xubinta kamidka ah qoyska ee loo xilsaaray waa inuu la xiriiraa kormeerahooda isla markaana raacaa tallada dhakhtarka. Xubinta shaqaalaha ah ayaa laga yaabaa inuu si fog u shaqeeyo waqtigaan, haddii ay suuroggal tahay.
 -
- Ka Helida Cudurka COVID-19
 - Xubin kasta oo shaqaale ah oo laga helo COVID-19, la nool qof laga helay cudurka COVID-19, iyo/ama ka ag dhawaaday qof qaba COVID-19 waxaa looga baahan yahay inuu si dhakhso leh u raaco tallaabooyinkan:
 - La xiriir kormeerahooda iyo HSSICK@hennepinschools.org ^{una} sheego xaaladiisa
 - Is-karantiilo sida ay dhigayaan siyaasadaha hoos ku qorani

- Shakhsiga ama xubinta kamidka ah qoyska ee loo xilsaaray waa inuu la xiriiraa kormeerahooda isla markaana raacaa tallada dhakhtarka. Sida dhammaan macluumaadka kale ee caafimaadka, macluumaadkan waxaa laga dhigaa qarsoodi. Xubinta shaqaalaha ah ayaa laga yaabaa inuu si fog u shaqeeyo waqtigaan, haddii ay suuroggal tahay.
- Marka uu Xubin Shaqaale ahi Ku Soo Noqon Karo Shaqada Kadib Markii uu Isku Arkay Astaamaha COVID-19 amaba Laga Helay
 - Shakhsiyaad kasta oo: (a) uu shaybaar xaqiijiyay inay qabaan COVID-19; ama (b) isku arkay astaamaha COVID-19 (ee kor lagu soo sheegay) waa inay joogaan guriga inta caabuqu hayo kumana soo laaban karaan shaqada ilaa ay u fasaxaan waaxda Maareynta Shaqaalaha iyo ay buuxiyaan shuruudaha hoos ku qoran:
 - Marka laga hadlayo shakhsi laga helay COVID-19, shakhsigu wuxuu ku noqon karaa shaqada marka dhammaan saddexdan shuruudood ee soo socda la buuxiyo:
 - ugu yaraan saddex maalmood (72 saacadood) ay kasoo wareegeen tan iyo soo bogsashada (xallinta qandhada iyada oo aan la adeegsan dawooyinka yareeya qandhada);
 - astaaamha shakhsigu ay soo reeyeen (tusaale ahaan, qufac, neef qabatin); iyo
 - ugu yaraan 14 maalmood ayaa kasoo wareegeen tan iyo markii ugu horreysay astaamahoodu soo if baxeen
 - Marka laga hadlayo shakhsiyaadka leh astaamo noqon kara COVID-19 ee aanu qiimeyn xirfadle caafimaad ama aan laga baadhin COVID-19, shakhsigaas waxaa loo qaadanayaa inuu qabo COVID-19, shakhsiguna dib uguma laaban karo shaqada ilaa shakhsigu uu dhameysto isla saddexda tallaabo ee kor lagu soo sheegay.
 - Haddii shakhsigu leeyahay astaamo noqon kara COVID-19 oo uu raba inuu ku laabto shaqada kahor intuuusan dhameysan muddada joogitaanka guriga ee kor ku xusan, shakhsigu waa inuu sameeyaa kuwan midkood (a) soo qaato qoraal xirfadle caafimaad oo u oggolaanaya qofka inuu ku laabto shaqada sida ku saleysan oggaanshaha cudur kale ama (b) helaa laba xaqiijin oo kala duwan oo ugu yaraan 24 saac u dhaxeeyso

oo sheegaya in qofka aanuu qabin COVID-19 taas oo laga helay xaruun sameysa baaritaanka caabuqyada ba'an oo loo ansixiyay baarista COVID-19.

- Siyaasada Ku Laabashada Shaqada Kadib Marka Laga ag Dhawaado Qof Qaba COVID-19
 - Shakhsiyaadka si toos ah ula kulmay qof qaba COVID-19 waa inay joogaan guriga 14 maalmood kadib kulanka isla markaana ay isbaadhaan. 14 maalmood kadib, haddii wax astaamo ah aysan jirin oo baaritaanaduna ay noqdaan kuwo taban (negative) shakhsiyaadku waxay si badbaado leh ugu laaban karaan goobihii shaqada. Shaqaaluhu waa inay waaxda Maareynta Shaqaalaha u soo gudbiyaan baaritaanka taban (negative) ee la xaqiijiyay.

Ka Qeybqaadashiinta Qoyska

Guudmar: Himilada & Mabaadii'da Hagida

Inkasta oo aan had iyo jeer ku dedaalno inaan qoysaska kala kaashano fursadaha waxbarasho ee tayada sare leh, xaaladeena cusub ayaa u baahan doonta in ka qeybgal badan ay sameeyaan qoysaska, iyo i ballanqaadyada dugsiga la cusbooneysiyo si meesha looga saaro caqabadaha ka qeybqaadashiinta qoyska. In kasta oo qaab dhismeedka Qorshahu uu tixgelinayo qeybaha shaqada iyo waxbarida ee ku laabashada dugsiga ee deyrta, waxaan ognahay in qoysaskeenu ay door muhiim ah ka ciyaaraan sidii qorshaheena labada dhinac looga wada wadi lahaa.

Waxaan ka maqalnay wada-xiriirka tooska ah in qaar badan oo qoysaskeena kamid ah ay shaqooyinkoodii waayeen, ama lacagta kirada lagu leeyahay, ama ay la halgamayaan cuno yari inta lagu jiro aafadan.

Caqabadahaas waaweyn ayaa ah astaamaha takoorka qaab dhismeedka ama nidaamsan, saboolnimada, iyo sinnaan la'aanta sida weyn u saameysa bulshadeena. Maadaama ujeedada jiritaanka Hennepin Schools ay tahay inay u jeexaan dariiq cadaalad ah ardaydeena, waxa naga go'an inaan sida ugu macquulsan ugu taageerno qoysaskeena dhibaatan.

Waxaan ku dedaali doonaa, inta lagu jiro xilliyadan lama filaanka ah ee adag, in dhammaan qoysaska Hennepin Schools ay dareemaan:

- In la taageero shucuur ahaan, waxbarasha ahaan, iyo xitaa dhaqaale ahaan markii ay suurogal tahay
- Lagu qalabeeyay agabka iyo ilaha ka caawiya ardaydooda shaqadooda
- Kalsoonida adeegsiga qalabka/baraha wax lagu barto ee qaabka fog
- La qiimeeyo shaqada adag iyo dedaalka ay wadaan si ay wax u baraan ardaydooda

Waxaan ku dari doonaa qorshaheena afarta caqiido ee asalka ah ee Karen Mapp ee ku saabsan ka qeybqaadashiinta qoyska:

1. Qoysaska oo dhama waxay riyoodaan carruurtooda waxaanay u rajeyaan waxa ugu fiican
2. Qoysaska oo dhama waxay leeyihiin awood ay ku taageeraan barashada carruurtooda
3. Qoysaska iyo shaqaalaha dugsigu waa shuraako siman

4. Masuuliyadda kobcinta iyo joogteynta iskaashiga ka dhexeeya dugsiga, guriga, iyo bulshada ayaa ku xidhan shaqaalaha dugsiga, gaar ahaan hogaamiyaasha dugsiga

Istaraatiijiyadeena ka qeybqaadashiinta qoysaska ee dib ugu laabashada dugsiga waxaa kamid ah

- Tababar ku saabsan siyaasadaha Baska iyo Imaanshaha
- Siyaasadaha badbaadada ee baska iyo fasalka
- Aqoon u lahaanta jadwalka ardayda (ee qaabka isku-dhafan iyo DL) iyo baraha teknoolajiyadda ee K-5 iyo 6-8
- Qalabka Wada Xiriirka ee Cusub: Talking Points
- Barnaamijka (App) Waalidka ee JMC.

Istaraatiijiyadahan iyo ilahan ayaa lala isticmaali doonaa ilaheena iyo qalabkeena caadiga ah, kuwaas oo ay ku jiraan hababka badan ee loogu talagalay la xiriirida dadka iyo xiriirka toos ah ee lala yeesho macallimiinta iyo shaqaalaha.

Taageerada Qoyska - Shaac ka Qaadida iyo Wax ka Qabashada Arrimaha Dibadda

Waxaa naga go'an inaan ka taageerno qoysaskeena baahiyaha ka dhasha meelaha ka baxsan goobta dugsiga, ballanqaadkaasi hadda ayuu ugu muhiimsan yahay.

Waxaan sii wadi doonaa nidaamkeena La Socoda Habdhaqanka Ardayga (CICO) kaas oo ay ardayda leh baahiyaha bulsheed-shucuureed iyo tacliimeed ee ugu badan ay ka heli karaan wada xiriir badan macallimiinta iyo hogaamiyaasha toddobaad kasta. "Qoddobadaas" dheeraadka ah ayaa naga caawiya inaan si joogto ah u oggaano baahida qoysaskeena iyo ardaydeena. Nidaamka CICO waxaa laga heli karaa hoos.

Ka sokow nidaamkeena CICO, waxaan sii wadi doonaa inaanu isku biirino Isu-duwaha Qoyska ee K-8 iyo shaqaalaha bulshada ee goobta si aan ula wadaagno macluumaadka qoysaska u baahan gaadiidka iyo guryeynta. Waxaan sidoo kale adeegsan doonaa macluumaadka iyo ilaha laga helo kheyraadka kala duwan ee maxalliga ah si aan u siino taageero guryeyn qoysaska. Shaqaalahayaga bulshada ayaa waliba balaarin doona diiradooda ku aadan u gudbinta qoysaska la-talinta si loo xaqiijiyo in qoysaska la siiyo taageero weyn inta lagu jiro xilligan adag.

Taageerada Qoyska - Ra'yi ku Darsashada, Wadaagida Macluumaadka, iyo Tababbarka

Waxaan ra'yiga iyo jawaab-celinta uga raadin doonaa qoysaska siyaabo badan. Iyada oo loo marayo sahanada qoyska, shirarka Gollaha Qoyska (bil kasta), iyo hawlaha qoyska ee u gaarka ah goobta sida, Muffins with Moms iyo Donuts with Baba, waxaan ku heli doonaa aqoon ku saabsan baahiyaha qoyska, waxaan waalidiinta la socodsiiin doonaa go'aanadeena, waxaan qoysaska la dhisi doonaa bulsho. Waxaan sidoo kale kordhin doonaa tirada aqoon isweydaarsiga iyo tababbarka qoysaska ee uu bixinayo Hennepin Schools sannadkan si loogu qalabeeyo qoysaska aqoonta iyo xirfadaha ka caawiya ardayda inay wax ku bartaan guriga.

Galida iyo Bixida

Nidaamka La Socoda Habdhaqanka Ardayga waxa loo sameeyay in lagu taageero ardayda iyo qoysaska iyada oo loo marayo xiriirka joogtada ah ee shaqaalaha iyo la xisaabtanka la kordhayay ee ay sameeyaan macallimiinta iyo hoggaamiyeyaashu. Waxaan aaminsanahay xiriir joogto ah oo lala yeesho ardaydeena aadka ugu nugul qaababka barashada fog ama isku-dhafan ay lama huraan u tahay fulinta ballanqaadka aanu siinay ardayda iyo qoysaska. Waxaan u tababbari doonaa shaqaalaha deyrta inay "sameeyaan" wicitaanada CICO iyadoo diiradda saaraya dareen dhaqameedka iyo habdhaqan wanaaga. Tababbar dabagal ah ayaa la qaban doonaa inta uu socdo sannadku hadba sidii loogu baahdo.

- Sameynta barnaamijyada, nidaamyada, iyo kheyraadku waxay:
 - Ahmiyad siin doonaan guusha waxbarasho, sinaanta iyo helitaanka loogu talagalay ardayda iyo qoysaska; iyo
 - U shaqeyn doonaan si heer sare, xisaabtan, iyo joogtayn leh.

Heerarka CICO	
Qaabka Fog ee Buuxa	Qaabka Isku-dhafan
<p>Heerka 1 = 1 wicitaan toddobaadkii</p> <p>Heerka 2 = 2 wicitaan toddobaadkii</p> <p>Heerka 3 = 3 wicitaan toddobaadkii</p> <p>Tababar = jiheynta shaqaalaha 1 kulan</p> <p>Iyo/ama, xogta Imaanshaha ee 2 toddobaad ee lasoo ururiyay iyo</p> <p>go'aansado cida wax ka helaya "Touchpoints"</p>	<p>Heerka 1</p> <ul style="list-style-type: none"> - 1 wicitaan toddobaadkii, marka lagu daro soo hubin uu sameynayo shaqaale aan macallin ahayn marka aad joogtid dugsiga <p>Heerka 2</p> <ul style="list-style-type: none"> - 2 wicitaan toddobaadkii, marka lagu daro soo hubin uu sameynayo shaqaale aan macallin ahayn marka aad joogtid dugsiga - iyo/ama, xogta imaanshaha ee 2 toddobaad ee laga soo ururiyay laguna go'aansado cida wax ka helaya "Touchpoints"
Koox arday ah oo tiradoodu xaddidan tahay ayaa ah Heerka 1 AMA Heerka 2	

Hennepin Schools waxay jeclaan labaayeen inay uga mahadceliyaan Coney Island Prep wadaagida dukumiintiyadooda guud iyo bixinta qaab dbismeedka Dukumentigan Qorshaha ah. Iskaashiga noocan ah oo kale ah ayaa dugsiyada wadankeena u saamixi doona inay ka gacan sareeyaan aafadan oo aan ku laabano shaqada aan dhammaanteen xamaasada u heyno.